TAXANAHA DHAXALREEB III/2007
Juun 2007 Ponte Invisibile Ed.

# "Dhulgariir"

## waa digniin culus!

Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraaga kor ku magacaaban oo laga xidhiidhi karo ibraahinhawd@hotmail.com**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabcay Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE.COM Publishing Group
Juun 2007 – daabaciddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay*.

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka*.

[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
*Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal*.

[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
*Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?*

[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
*Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.*

[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
*Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed.*

[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
*"Dhulgariir" waa digniin culus*

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

# "Dhulgariir" waa digniin culus

*Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"*

*ibraahinhawd@hotmail.com*

Maanso walba oo ka timaadda Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi" markiiba waxay kicisaa xiisaha iyo dareenka dhammaan dadka afka soomaaliga ku hadla. Awood iyo saamayn sidaas u weyn in maskaxda bulshada lagu yeeshaa, weliba marxaladdan xun ee tafaraaruqa iyo kala tagga ah, run ahaantii arrin fudud ma aha. Waxayse ku tusaysaa sumcad weyn oo uu abwaanku muddo dheer soo urursaday kuna saabsan suugaantiisa wanaagsan iyo fekerkiisa xoogga leh ee qumman. Taas ayaa keentay kalsoonida badan ee halabuurkiisa loo hayo.

Sidii lagu yaqaannay ayuu dulmiga burburinayaa xaqa iyo samahana dhisayaa. Sidii lagu yaqaannay ayuu ka digayaa halis mustaqbalka ku soo jirta. Sidii ayaa eray walba looga garaabayaa isaga oo adeegsanayaa xeelad uu qudhiisu tixdan ku xusayo, taas oo ah:

Sidii lagu yaqaannay ayuu dulmiga burburinayaa xaqa iyo samahana dhisayaa. Sidii lagu yaqaannay ayuu ka digayaa halis mustaqbalka ku soo jirta. Sidii ayaa eray walba looga garaabayaa isaga oo adeegsanayaa xeelad uu qudhiisu tixdan ku xusayo, taas oo ah:

***Dadka dhiirri iyo qawl san baa lagu dhacsiiyaaye***
***Sida loo dhahaa buu khalqigu ugu dhegtaagaaye***
***Dhunkaal iyo xajiin lama marshiyo dhuumatiyo sheele***
***Sida dhuuni-qaataha murtida looma dheehtiro'e***

Maantana arrinka uu Hadraawi ina hor keenay waa mid aad u culus. Sida uu uga maansoonayaana waa si culus. Tixdii "Daalallay" haddii ay siddeetannada dhexdoodii ee qarnigii dhammaaday digniin run ah oo argaggax badan mustaqbalka ka soo qaadday, markii laga gaashaaman waayeyna tabtii la sii sheegay u dhacday, "Dhulgariir" iyaduna waa saadaal kale oo laga soo qaaday mustaqbal durba ifafaalihiisu muuqdo. Ma aha wax qarsoon ee sida cadceedda ayey inoo hor taal, waana la baajin karaa haddii la doono. Waa takoorka iyo gumaynta qayb bulshada ka mid ah lagu hayo, weligeedna lagu hayey, iyo aayaxumada taas ka soo jiijii leh.

Hordhac, halqabsi iyo sifayn ku saabsan qiimaha sare ee ay guud ahaan suugaantu leedahay ka dib, mas'aladaas kor ku xusan ee hayb-takoorka ayuu abwaanku dhawr iyo toban xaglood marba mid inaga tusayaa. Heerar kala sarreeya iyo hirar kala shisheeya ayuu marba mid ina geynayaa. Dhawaaqa ayuu mar kor u qaadayaa marna hoos u dhigayaa bal kol uun in uu dhego u nugul helo. Mar si debecsan ayuu inoogu caqlicelinayaa, mar kalena si kulul ayuu inoo canaananayaa. Mar buu godobta geedka taal soo taariikhaynayaa, mar kalena

ayaaxumada ay soo siddo ayuu sii oddorosayaa. "Dhulgariir" ugu horrayn waa shaabuug ku dhacaya umadda soomaalida oo lagu dhaliilayo dhaqan iyo anshax burbur bulsheed:

*Waxaa lumay dhudhumintii runtiyo dheelli-tirihiiye*
*Inta samaha dhuxulayn kartaa waa dhif iyo koowe*
*Dhalool bay isugu biirtay iyo tii dharjo ahayde*
*Marka ay dhanaaniga gashiyo dhiibta kala guurka*
*Dhiilaha nin buuxshaa ma jiro dhacarta jiilaale*

Haddana waxaa loo gudbayaa qiso ku saabsan shakhsiyad lagu magacaabo "Hibo" taas oo lagu mannaystay qurux jidh ahaaneed, mid dabci ahaaneed iyo mid dhaqan ahaaneed intaba. Waxaana quruxda iyo gobannimada "Hibo" tusaale habboon looga dhiganayaa sawirro ay isha aragtaaba ku liibaanayso. Tusalahaas waxaa ka mid ah noolaha loo yaqaan roobladhac. Noolahaas yaabka leh waxaa lagu arkaa oo keliya degaanka carra-sanka ah, wuxuuna soo baxaa oo keliya jeerka dhulka roob wanaagsani maro, ee ay ciiddu tahay nadiif rays ah. Roobladhaca markaas ka hor iyo ka dib toonna il lama saaro, kamana soo baxo dhulalka ah dhagaxa, dhanaan, dhoobayda, ama qabow. Sidaas darteed waxaa lagu sheegaa in uu samada ka soo dhaco oo dhibicda roobka la socdo. Run ahaantii waxaa jira dareen roobladhaca ku saabsan oo ah sidiisaba in aanu ahayn nooli dabiici ah, ee yahay muuqaal haddana ruuxi ah. Midabkiisa casaan-dhiinka ah, bilicdiisa nadiifta ah, cusaybkiisa iyo caafimaadkiisa aan kala dhinnayn, dhulka uu ku socdo wanaaggiisa iyo udgoonka rayska, iyo guud ahaan jawiga roobban ee ku xeeran, intuba isha roobladhaca aragta waxay ku ridaan farxad iyo liibaan aad uga sarreeya ubaxa la isu hadiyeeyo ka ugu qaalisan:

***Laan dharab ka toostiyo Hibooy dhool cas baad tahaye***
***Dhalankaagu waa luulka iyo dhiraha yaaquude***
***Malaa roobladhaca waad taqaan dhiinka jookha lehe***
***Dhalankiisa shaygaa gobta ah waad u dhigantaaye***
***Dhibic iyo cadceed looshan iyo dhool gu' baad tahaye***
***Dhebi heeg u baxay baad ka tahay dhoobo-jiifyada'e***
***Dhul fog baad ka laacdaa sidii dheenta laalida'e***
***Ruuxii ku dhawraa si buu kuugu dhegayaaye***
***Dheehaaga maahee shishaad dhuux u leedahaye***

Haddii ay abuurta dabiiciga ah ee "Hibo" sidaas tahay, waxaa ku dhacaysa mashaqo weyn oo gebigeedaba dhalan doorinaysa. Qoftii quruxdeeda iyo dadnimadeeda cajabta leh la ina soo tusay waxaa la inagu soo celinayaa iyada oo beddelan oo qalbiga dhiig ka da'ayo indhahana ilmo qulqulayso. Dhagar dadnimadeeda oo dhan laga galay baa sidaas u xanuunjinaysa. Dabadeed waxaa loogu baroordiiqayaa, haddii ay baroordiiqi wax tarayso: "Adiga iyo ta ku liidaysaa isku ab iyo isir baa tihiin, dulmiga faafay ee adiga 'gunta' kugu sheegay iyadana 'gobta' ka dhigay ayaa dadnimadaadii iyo duntaadii wanaagsanayd bah'dilay oo ku dhabandaadiyey." Sida aad arki doonto labada meeris ee tuduca soo socda ugu hooseeya ayaa ku filan tixdan in loo bixiyo "Dhulgariir":

***Dhulka lagama soo qodin dadkee Aadan baa dhalaye***
***Adigiyo hablaha dhinaca kale waysu dhigantaane***

***Dhawawelanka waxa kuugu wacan amase dhoohnaanta***

***Dhab-darrooyinkoodaa qalbigu dhaawac dumayaaye***
***Dhimir bay ku saareen dabool baali kaa dhigaye***
***Dhaqaaq joogsigaagiyo wejiga dhaxanta saarsaaran***
***Dhadhansiga dareenkaa ka culus buuro soo dhacaye***

Laba meeris oo midkood tixda halkan kaga jiro ka kalena meel dambe, ayaa habboon in aad la isu dul taago, si gaar ahna looga doodo marka arrinkan laga hadlayo. Waayo aragtida ay gudbinayaan waa xeer ama qaacido aadamiga sida hagaagsan u fekera oo dhami isku raacay, ayna tahay in la isku raaco si dunida loogu wada noolaado iyada oo dad la yahay ee aan dugaag la ahayn. Labadaas meeris waxay odhanayaan:

*Intaad adigu dhiillaysan tahay taydu waa dhicise*

iyo:

*Nin xaqiinna meel hoose dhigay tiisu waa dhedo'e*

Aragtida meelmarka ah ee halkaas ku jirtaa waa ta odhanaysa "caddaaladda ama sinnaantu ma qaybsanto". Taas macnaheedu waxaa weeye: haddii aad oggoshahay in la kala sarreeyo, ama aad doonto in aad qof kale ka sarrayso, isla markaas waxaad oggolaatay adigana in lagaa sarreeyo. Haddii aad qof addoomiso ama gumayso, diyaar waxaad u tahay adigana markaaga in lagu addoomiyo oo lagu gumeeyo. Taas waxaa liddi ku ah in aad gebi ahaanba diiddo qof bani aadam ahi in uu isir ahaan ka hoosayn karo qof kale. Waa halkaas meesha uu abwaan Hadraawi ka leeyahay: "Anigu gob ku noqon maayo gumaynta qof kale."

Taariikhda, ama aan idhaahdo hadaltirada, ku saabsan hayb-takoorka la soo kala dhaxlay beeninteeda, iyo sida ay u tahay khuraafaad aan caqliga iyo runta la shaqaynayn, ayaa ka mid ah dhinacyada badan ee ay "Dhulgariir" wax inaga tusayso. Lama hayo, haba yaraatee, raadraac taariikheed oo caddaynaya waxyaalaha loo cuskado dhaqanka takoorka. "Bakhti bay cuneen" oo ah qodobka ugu muhiimsan ee la isu soo tebiyey ma jiraan wax caddaynayaa. Haddiise uu xitaa kaas qudhiisu jiri lahaa kun waxyaalood oo caqli ku wada dhisan ayaa burinaya. Waxaa ugu horraysa in la yidhaahdo: haddiiba uu jiro nin kun sano hortood cad xaaraan ah cunay, dembigaas dhashiisu miyey la wadaagi kartaa? Maxaase ka galay qofka maanta nool? Markaa caqli ahaan sow noqon mayso qofkii beri dhiig galay firkiisa oo dhami waa wada gacan-ku-dhiigle, ninkii maalin wax xadayna dhashiisa iyo dhashoodu weligood waa tuug? Eeddaas dulmiga iyo dhalanteedka ah tixdu waxay ka tidhi:

***Dhaf-dhaf iyo halhays beena baad soo dhabdhabateene***
***Dhugatiyo cad xaaraan ah iyo dhoohan may cunine***
***Dhamaas lagu takooriyo ma jirin caado dhaaf kale'e***
***Dhab cad iyo ma haysaan daliil meel la sii dhigaye***
***Dhaqankaas cambaaraynayaa saaray dhiillada'e***

Waxaas liita ee aan salka iyo raadka lahayn waxaa ka dhashay in qayb dhan oo umadda ka mid ah intaas oo qarni dulmi aan dhammaad lahayn lagu hayo. Intaas iyaguna, illayn dhagxaan ma aha ee waa dade, waxay sugayeen mar uun

in waa' sami beryo oo ay dadkooda nolosha ula sinnaadaan. Sideedaba rajada wanaagsan iyo yididdiiladu waa waxa dadka dulman nolosha u suurtageliya, haddii kale xanuunka ma ay xammileen oo waa ay dhiman lahaayeen. Waa sida ka muuqata, tusaale ahaan, taariikhda dadka afrikaanka ah ee dhulalka caddaanka qarniyada badan lagu adoominayey, iyo addoonsigii iyo cadaadiskii kala duwanaa ee ay dadka yuhuuddu soo mareen. Labadaas qolaba waxay reebeen dhaxal isugu jira halhaysyo, maansooyin iyo sheeko-xariiro ay ku saadsanayaan mustaqbal gobannimo leh. Halkaas ayey ka timid qisada ah in ay reer Israa'iil isugu iman doonaan Quddus oo dawlad xoog leh ku noqon doonaan. Iyo madowga oo rumaysnaa in uu boqor madow oo aan weligii la gumaysani badbaadin doono (waa halka ay jamaykaanku kaga xidheen boqor Xayle Selaase). "Dhulgariir" waxay tidhi:

***Intii aad dhisnaydeen iyagu waa dhursugayeene***
***Dhufaannimo hagooglay intaas kula dhex joogeene***
***Dharaar uun in waa' kale beryey dhawrayeen abide***
***Dhegahay intaas la hadlayeen waa dhab may odhane***
***Dhibaatadana way eegayeen dhaayihii jiraye***

Haddii ay soomaalidu ragannimada ku miisaami jirtay ugu horrayn ninku inta uu dagaalyahan iyo geesi yahay, iyo inta ay riddadiisu wax disho, ragga u dhashay beelaha la hayb-sooco waxaa la isu wada sheegay taas in ay balaayo ku qabeen. Laakiin geesi kasta oo ka soo baxa geesinnimadiisa lama qirsanayn, geesinnimadana haddii aan libteeda laguu qirin waxba kuuguma filla. U fiirso:

***Cishaday dhanaan tahay haddii laysu dholol fayto***
***Dhab u dirirka waa lagu yiqiin dhaanto iyo shiishe***
***Rag hadduu dhabiiltamo naftay dhigi yiqiinneene***
***In kastuu xiniindhaaf yuhuu dhiirrinnimo sheegto***
***Mar haddaan dhaliil laga gudbayn dhayalso mooyaane***
***Dareenkiisu wuxuu dhaadayaa hoos in loo dhigaye***

Waxtarnimo marka ay noqoto, laba iskuma diiddana dadkani in ay ahaayeen lafdhabarta bulshada. Mar haddii ay xaqiiqo tahay farsamada ugu sarraysa ee la haystay in ay keligood soo saari jireen, sida gudmaha iyo kabaha oo aan midkoodna nolosha looga maarmin, wax ay ka dhaqdeen oo loo oggolaa, ama maamuus iyo abaal loogu hayey ma jirin. Mayee waxaaba lagu khasbay in ay ku noolaadaan heer dadnimada ka hooseeya. Intii ay bulshada soomaalidu noolayd iyagu waxay ahaayeen qalab nolosha lagu bislaysto, si la mid ah sida dhardhaarrada wax loogu karsado. Markaas baa weliba taas loogu daray cay iyo xaqiraad aan xuduud lahayn. Bal murtidan dhadhanso:

***Dhardhaarray ahaayeen intaad dheri lahaydeene***
***Ninka ay dhisaan baan isagu tooda dhaydhayine***
***Gudmahay dhabeeyeen ka badan lag iyo dheeraade***
***Hadday dhigan lahaayeen mid uun maalba may dhaqane***
***Dhaxalkiisa may soo xarayn dhogorta xoolaaye***
***Weligood dhalaal subag ah iyo dhaashi may heline***
***Dhay iyo karuur labada weel dhoosha may geline***
***Hadday dhami lahaayeen miduun dhiilba may tolane***

***Dhegahooda maag baa qabsaday shayna may dhimine***

***Sibaa loo dhalliilaa haddana ruuxna may dhibine***

Wax balaayadaas la soo wadaba, maanta xaalku wuxuu taagan yahay meel xun, wuxuuna u gudbay heer khatar ah. Oo waa maxay? Cidahani waxay u fadhiyaan shir ay kaga tashanayaan dhulkaba in ay ka dhuyaalaan oo dadka cad isu dhiibaan:

***Dhuyaal iyo kudaal bay damceen dhiigna may galine***
***Dhulka waa ka sii guurayaan ruuxna may dhicine***
***Dhoof bay ku daasteen inay sibiq dhaqaaqaane***
***Dhalashada inay dooriyaan bay u dhow dahaye***
***Dhagar inay galaan bay damceen dhaarse may marine***
***Dhaaxaan ogsoonaa halyey dhuuntay keligiiye***

Dabadeed dadkaas abwaanku wuxuu ku guubaabinayaa in ay dib isugu noqdaan, in aanay dalkooda ka qaxin, xumaanta ay tirsanayaan in aanay xumaan kale ku beddelin, dhibaatadii lagu hayeyna maanta waa dabayaaqo ee ay nabsi-baxa kaabiga ku soo haya samihiisa maalaan. Naftuna marka ay ciishooto haddii hoggaanka loo sii daayo khayr ma soo hooyso ee ay dulqaad yeeshaan oo wanaag xeeriyaan:

***Godka dhidarka beelaha qotoow dhawr kal baa hadhaye***
***Hadduu dhiillo leeyahay dulmigu waad ka dheregteene***
***Intaad weel manno ah dhaamiseen waa dheg weyn tahaye***
***Dhanihii bad weyntiyo yuryuran waydinkii dhuraye***
***Ulihii dharkaynkiyo cayada waydinkii dhilaye***
***Dhamacdiyo dabkaad quudateen maaha dhalanteede***
***Dhayal maaha maalmaha intaad guulo dhigateene***
***Sabirkiinna dheer iyo xaqaa tiina soo dhicine***
***Adduunyada ninkii dhalad yaqaan waw dhab tiriyaaye***
***Dhibaatiyo waxaa lagu yaqaan teeda dhinac taale***
***Markaasay is dhaafdhaafayaan labada dhoomoode***
***Meel dhowna wuu kula kulmaa kay ka dheer tahaye***
***Meel dheerna way kala tagaan kay ku dhow dahaye.***

***Nin xaqiinna meel hoose dhigay tiisu waa dhedo'e***
***Xumaantana wanaag baa dhaxlee wayda haw dhimane***

***Naftu dhaabadhaabaha hiyiga way ku dhacantaaye***
***Kol haddii dhabbada loo qorqoro way ku dhilantaaye***
***Mar haddii qalbiga ciil dhufsado dhaaftay taladiiye***
***Sida Dhooddi-Meerkii Taleex haw dhaqaaqina'e***
***Dhirbaaxooyinkii quudhsigaa dhuunta yuurura'e***
***Haddii dhagar inaad gaysataan laabtu dhigi waydo***
***Sidaad dhaab u soofaysateen haw dhabaynina'e***
***Cishadaad wax dhiillayn kartaan dhaafa tii culuse***
***Dhanka Eebbahay xiga adduun wayska dhalanteede.***

Waxaa iyaduna jirta arrin yaab leh oo aan malaha Hadraawi ka hor cidiba ku baraarugin. Arrintaasi waxay tahay, gumaystihii reer yurub haddii uu dalka wada qabsaday, oo dadka soomaalida wada gumeeyey (marka si toos ah xaaladda loo soomaaliyeeyo), sow gunnimada looma sinnayn? Dabcan jawaabtu

waa haa. Markaas ma jirin qof soomaali ah oo gobannimo sheegan karayey ka hor 26/06/1960, mar haddiiba ay taladu cid kale oo aan soomaali ahayn gacanta ugu jirtay. Dabadeed waa tii ay soomaalida oo dhami ku heshiisay in shisheeyaha lala halgamo si gabannimadii loo soo ceshado. Halgankana isku heer iyada oo la joogo ayaa la bilaabay, loomana kala hadhin.

Markiise gobannimada la qaatay, shisheeyihiina la caydhiyey, waxaa dhacay qalad weyn oo ay ahayd in aanu dhicin. Qaladkaasi waa iyada oo aan bulshadii soomaalida ee gobannimada u wada halgantay haddana gob wada noqon! Xaggee maalintaas gobannimada lagaga reebay dadka imika la leeyahay "gun baad tihiin"? Markaas run ahaantii "dhaqanka gumaynta" waxaa la odhan karaa wuxuu lahaa laba marxaladood oo kala ah gumaystihii reer Yurub ka hor iyo ka dib. Maalintii dawladnimada la qaatay, sida uu abwaanku qabo runtuna tahay, waxaa luntay fursad aad u weyn oo erayga "gun" lagaga takhallusi kari lahaa. Waxaase meesha taallay wacyi xumo aad u ba'ani. Sidan ayey wax u dhaceen:

***Dhabdhabluhu markuu yimi arlada may dhammayn talo'e***
***Waa tay dhufaannadu khalqiga soo dhex geliyeene***
***Waa kii dhamaastiyo falkiyo keenay dhalanteede***
***Waa kii dhibaatada la yimi dheegadheegaha***
***Waa kii dhufaysyada qotee dhoombir soo rogaye***
***Waa tay dhankaas iyo dhankaas baahday dhiilladuye***

***Markay dhabaqday waa kii shacbigu soo dhalaashadaye***
***Waa taad dhadhaabtiyo budkiyo dhagaxa boobteene***
***Gobannimada waa tii dhagdhago dhaanto loo tumaye***
***Dharaartaana waad wada jirteen dhiiftu kululayde***
***Waa loo dhammaa maalmihii laysu dhaarsadaye***

***Hayeeshee ma sii dhugan caqligu teeda dhinac tiille***
***Dhiilladu halkay weeran tahay looma faal-dhigine***
***Waa tii la dhaawacay markay dhalatay guushiiye***

***weligeed dhan baa qaawanaa dhidibbadeediiye***
***Xaajadu intay dhow dahay dhaymo leedahaye***
***Shinkeedii markay dhaaftay bay keentay dhabandheebe***
***Dhab-darro uma toosine nabsigu wuu dharaarsadaye***

Dhambaalkan soo socdaana isaga oo mas'alada ku taxan wuxuu leeyahay: dadkiinnii aad waxaas oo dulmi ah ku hayseen waxaa ogaaday nin aan iyaga iyo idinka idin kala jeclayn ha yeeshee arrimahan oo kale ka faa'iidaysta. Waa reer galbeed oo diyaar u ah umaddan dulman in ay idinku hubeeyaan oo cadow idiinka dhigaan, amaba rartaan, amaba si kasta oo xun u adeegsadaan. Umadduna waa in ay daldaloollada noocaas ah iska awddaa, haddii kale cadow waliba wuu uga soo dhacayaa:

***Dhacan baa la saaraa halkii eel ka dhow dahaye***
***Markaasay dhurwaagiyo colkiyo dhawrta celisaaye***
***Nin dhug lihiba wuu garanayaa suuldhabaalaha'e***
***Dhabbadaad u xaadheen ninkii soo dhus layn jiraye***
***Dhextaalkeeda goortuu hubsaday soo dhabbacateeye***
***Dhaliilaha markuu sahansaduu meel ka soo dhacaye***

***Waa kaas dhaqaaliyo hub iyo dhoof u soo helaye***
***Dhuxul hoos ka nool iyo dab baa soo dhabiib kiciye***

Hadraawi maantana ma uu illaawin in uu halgaado arrin uu dhawr iyo tobankii sano ee la soo dhaafay warmaha la dhacayey, taas oo ah wax uu u arko foolxumada ay ilbaxnimada reer galbeedku aadamiga u horseedday. Dunida maanta muuqataa waa mid nuxur beeshay ka dib markii loo rogay maaddi aan qiimi kale ku fadhiyin oo la boobayo. Umadda soomaalida ee aan la hadlayaana, ayuu leeyahay, waa mid qudheeda lagu gumeeyey sandareerada dullaynta ah ee reer galbeed. Waa kuwaas dadkii soomaalidu dawarsiga ku nool, waana kuwaas jidh ahaan, akhkaaq iyo bulsho ahaanba qalqalloocsamay ee wada doorsoomay:

***Dhillowyahanku waa geed ka baxa dhuunta geed kale'e***
***Imikuu dhabbada soo hayaa dhaankii reer Yurube***
***Nin kastoo is dhoob-dhoobi jirey dhigaha loo laabye***
***Dheweraad hadday kala lahayd laysu soo dhuraye***
***Markii dhuuni loo rogay arlada dhoorku wada daalye***
***Waa taa ninkii dhawrsanaa qaad ku soo dhacaye***
***Waa taa dhabeeshii hiddaha dhaylo loo dubaye***
***Dheri bay ku wada foorortaa diiddan dhaqankiiye***
***Dhegdheggiyo lafaha dhuubtay iyo dhogor xumaantooda***
***Qaraamaad markay wada dhantaa dheehu doorsamaye***
***Hadday dhoojo wada yeelatiyo dhiico iyo tuure***
***Haddii dhawrsanaan lagu yiqiin dhimay hankeediiye.***

Ugu dambayn tuduca gunaanadka ah wuxuu inagu leeyahay: waar foolxumada hayb-sooca hore ayaad wax uga qaban waydeene, maantana halkii ha ka sii wadina e, dhaar baan idin marshaye arrinka wax ka qabta! Xanuunka aad dadkiinna ku haysaan uga tudha, aayihiinna ummadnimana "dhulgariirka" ku soo foo leh ka badbaadiya!

***Dhibaatada xilkeedii horaad ugu dhabcaasheene***
***Maantana sidii dhagax-dixeed hawgu sii dhegine***
***Inta shay la dhawrtiyo haddaan diinta kugu dhaarsho***
***Haddaan dhaar Carriyo Caaggan iyo dhaar Cas kugu dhaarsho***
***Inta gabay dhaf leeyahay haddaan kaaga dhirafuulo***
***Haddaan dhaho haddaan dhigo haddaan weliba dhiib-dhiibo***
***Anigoon wax kuu dhimin haddaan dhegaha kuu buuxsho***
***Dhaqdhaqaaq ma kaa iman karaa dhiillo lagu baajo?***

***Dhabtuun baa khalqigu diidayaa meesha dheer tegaye***
***Dhulgariirka waa laga baqaa waayo soo dhaxaye***
***La dhex joogi maayoo arlada dheelmashow qorane***
***Qofba wuxuu dhigtaa baa u yaal dhiilka aakhiro'e***
***Ninkii dhiirri sheegtow is furo waa dhanaan tahaye!***

Halkan waxaa xiiso badan in aynu ku hakanno saddexda dhaarood ee uu abwaanku isdaba dhigay ee kala ah "Dhaar Carro", "Dhaaddan" iyo "Dhaar Cas". Dhaarahaas xilligan lama adeegsado oo waa ay gaboobeen, dadkii hore ayaase ku dhaaran jiray. Waxaa la sheegaa "Carro" in uu ahaa awoow hore oo lagu abtirsado, kana sii shisheeya awoowyada maanta tooska loo sheegto. "Caaggan" iyaduna sida aan filayo waa la mid. Laakiin "Dhaar Cas" waxay u badan tahay in

ay ka timid dhaqan isaguna gaboobay oo sheegayey labada cirguduudood dhaarta iyo habaarku in ay kacaan. Sidoo kale marka la dhaaranayo in ciid cas kor loo saydhaa waxay ahayd dhaqan jiray. Qodobkan dambe wuxuu xidhiidh la yeelan karaa xabaasha ama dhimashada.

Guud ahaan magacyadaasi, sida aan u badinayo, waxay ku siqayaan Diinta Islaamka ka hor, waxayna la xilli yihiin labada taallo dhagaxeed ee la sheegay in ay weli ku yaallaan galbeedka Hargeysa, laguna kala magacaabo "Tin Carro" iyo "Tin Niiq". Arrimahan oo dhan ee aan malamalaha ku keenay waxaa habboon in Hadraawi qudhiisa laga waraysto. Waxaanse hubaa ujeeddada uu halkan u keenay waa taariikhayn iyo xasuus.

Haddaba Hadraawi haddii uu caado u lahaa qadiyadda uu rumaysan yahay in uu si shakhsi ah ugu halgamo, oo fulinteeda u qalab qaato, waxa uu diiddan yahayna gawraceeda mindida daabka u qabto, tixdan dhaxalgalka ah ee "Dhulgariir" waa farriin umadda toos ugu socota. Bulshada labadeeda dhinac ee ay mashaqadu dhex taal ayuu mid walba u dirayaa waano, canaan, abhin, guubaabo, talo iyo tusaale. Taas sababteedu waxay noqon kartaa arrinta meesha taal oo ah mid u baahan wacyi guud iyo isbeddel bulsho, oo aanay qof keli ah iyo kooxi keli ahi waxba ka qaban karin.

Aynu isweydiinno haddana, awoodda hal-abuur ee Hadraawi maanta heerkee ayey kaga jirtaa taxanaha dheer ee suugaantiisa? Weli ma kor bay u socotaa, mise hoos ayey u soo dhacday, mise waxay joogtaa meel ay ku xasishay?

Aan ku horreeyo in aan idhaahdo, sannadihii sagaashannada dhexdoodii isbeddelkii weynaa ee Hadraawi ku dhacay, run ahaantii ma beddelin oo keliya nooca iyo nuxurka maansadiisa, waxayse gelisay dardar cusub. Markaas ka dib suugaantiisa wuxuu u helay dhul dihin oo ay hoobaantu raaracdo, una hayo niyad iyo tamar nafsadeed oo aad u badan. Taasi waxay ahayd diinta iyo akhlaaqda, iyo doorkooda dunida iyo nolosha. Aad baan uga shaki qabaa Hadraawi haddii aan isbeddelkaasi ku dhici lahayn maansadiisa xilligaas ka soo bilaabatay in ay yeelan lahayd waxaas oo tiro ah iyo waxaas oo tayo ah. Waayo, sidii aan beri hore ku xusay qoraal ku saabsanaa tixdii "Dabahuwan", xilligaas halgankii siyaasadeed ee uu muddada dheer ku soo jiray wuu ka dardugay oo nafsad uma uu hayn. Isla markaas fikradihii uu rumaysnaa oo dhan waxaa ku dhacay fashil iyo khasaare, sidii ku dhacday bani aadam kale oo badan, waana kii Hadraawi sidii uu u xiimayey derbiga ka soo go'ay.

Waxaana muuqata Hadraawi weli in aanu ka qaraarin maansadii diineed iyo akhlaaqeed ee uu xilligaas soo bilaabay. In kasta oo "Miinleydii" tan ka horraysay ay qurux badnayd, haddana run ahaantii ma ay gaadhsiisnayn heerkii yaabka lahaa ee aynu maansadiisa ku barannay. Laakiin tixdan "Dhulgariir" waxay ku biiraysaa heerka koowaad. Haddiise ay khasab noqoto in aynu ka raadinno dhaliil aan maansada Hadraawi dabci u ahayn, dhaliishaasi waa erayo tobaneeyo ah oo tixda marar door ah ku soo noqnoqday. Taas ma ku sheegi karraa hoos u noqosho ku bilaabatay maansada Hadraawi? Mooyi.

Dhanka kale, anigu ma taageersani, haba yaraatee, fikradda la wadwado ee sheegaysa "Hadraawi wuxuu waddada u bannaynayaa afmaallada cusub". Halabuurku uma baahna in waddo la isu banneeyo, qofkii wax isku hayaana

waddadiisa wuu bannaysanayaa isaga oo aan cid kale ka haybaysan. Hadraawi iyo abwaan walba oo kalena waxaa la gudboon suugaanta in aanay cidna u xeerin cidna waddo u bannayn. Inta ay nool yihiin tix walba oo ay curiyaan waa dhaxal ummadeed oo aan wax lagu gadan karaa jirin.

Aan ugu dambaysiiyo in aan idhaahdo: qofkii ugu horreeyey ee tixdan qoraal ahaan saxaafadda u soo bandhigay, in kasto oo uu hawl wanaagsan qabtay kuna mahadsan yahay, wuxuu u soo qoray si aad iyo aad u tayo xun, qaladaad aan xad lahayn ayaana ka buuxay. Maalmaahs ay soo baxday ayaan wax ka saxay, waxaanse mar dambe arkay weli in ay dhaliilo door ahi ku jiraan. Haddaba nuqulkaygan hoos ku qoran ayaan malaynayaa in uu ugu saxsan yahay qoraalka ilaa imika la hayo, sidaas darteed ciddii xiisaynaysaa ha ka qaadato.

---

## Dhulgariir

*Axmedoow nin dheeraad sitoo dhiibsan baad tahaye*
*Tu kalaad u dhaaftaa kolkaad dhaliso tii roone*
*Dhallintii caleemaha lahayd waygu dheer tahaye*
*Dhawr iyo shan dhawr iyo haddana dhawrar baan jiraye*
*Haddaan Beegsi kala soo dhex baxay tooda meel dhigaye*
*Labadii dhallaannimo lahayd ways dhar urisaaye*
*Berberaawi dhuub iyo ka dhuub waysu dhurannaaye.*

*Ilhaaneey dhiggaagiyo hablaha dhuude falanqeeye*
*Hadduu dhaguxu kala hayb tirsado dheemman baad tahaye.*

*Suugaantu waa dhaqan haddana waa sud iyo dhiibe*
*Dhidib iyo lud bay leedihiyo dhaabad iyo meele*
*Dhuuxuu ka eegaa ninkii dhilan yaqaannaaye*
*Qofba waa dhankuu ka arko iyo meesha uu dhigo'e*
*Dadka dhiirri iyo qawl san baa lagu dhacsiiyaaye*
*Sida loo dhahaa buu khalqigu ugu dhegtaagaaye*
*Dhunkaal iyo xajiin lama marshiyo dhuumatiyo sheele*
*Sida dhuuni-qaataha murtida looma dheehtiro'e*
*Dhiidhiga nin laasimay hadduu dheegto waa halise*
*Dheeldheelligaa laga jiraa waa la dherershaaye*
*Dhexrooriyo waxa lagu hojaa weliba dhaad dhaade*
*Dhoomaha waxaa laga xushaa teeda dhumuc weyne.*

*Hadalkana nin yidhi waa dhigaa sii dheh baa dilaye*
*Inaan dhaabadeeyaan rabaa dhawr kal dabadeede*
*Dhaxalkeeda nimankii lahaa way dhebaan-dhebiye*
*Iyagaa dharaaraba intaan dhaafay sii odhane.*

*Gabaygani dhambaal buu sidaa waayo soo dhaxaye*
*Dhulgariirna waa kii la baxay dhalashadiisiiye*
*Dhawdhawda qaadkiyo ka culus dhaan wadaa yidhiye*
*Kana dheer is yeelyeelka iyo ii dheh iyo faane*
*Qof dhabcaala mooyee nin kale waw dhadhamayaaye.*
*Xaajada halkaasaan dhigoo dhaabad baw dihine*

*In la sii dhaqaajay rabtaa dhaygag badanleeye*
*Oo loola dhaadhaco halkay dhuux ka leedahaye.*

*Waxaa lumay dhudhumintii runtiyo dheelli tirihiiye*
*Inta samaha dhuxulayn kartaa waa dhif iyo koowe*
*Dhalool bay isugu biirtay iyo tii dharjo ahayde*
*Dhulka wuu ku soo badanayaa baal ku dhoorruhuye*
*Dhan-xiirradu haddii ay maqlaan ways dhufanayaane*
*Sinnaantay dhaliil moodayaan tii Ilaah dhigaye*
*Dhinacay ka joogaan sharciga waa dhis foorora'e*
*Marka ay dhanaaniga gashiyo dhiibta kala guurka*
*Dhiilaha nin buuxshaa ma jiro dhacarta jiilaale*
*Dhirin-dhirintu waa shay sanoo lagu dhabriiraaye*
*Hal-dhabaalahaa awgayoow tii dhammayd geliye*
*Hays dhigan nin nooloow hiddadu waysu dhimataaye.*

*Hadalkana nin yidhi waa dhigaa sii dheh baa dilaye*
*Inaan dhaabadeeyaan rabaa dhawr kal dabadeede*
*Dhaxalkeeda nimankii lahaa way dhebaan-dhebiye*
*Iyagaa dharaaraba intaan dhaafay sii odhane.*

*Laan dharab ka toostiyo Hibooy dhool cas baad tahaye*
*Dhalankaagu waa luulka iyo dhiraha yaaquude*
*Malaa roobladhaca waad taqaan dhiinka jookha lehe*
*Dhalankiisa shaygaa gobta ah waad u dhigantaaye*
*Dhibic iyo cadceed looshan iyo dhool gu’ baad tahaye*
*Qurux iyo dheg baad leedihiyo dhaabad iyo seese*
*Dherer iyo laf baad leedihiyo dhaygag iyo yaabe*
*Dhebi heeg u baxay baad ka tahay dhoobo-jiifyada'e*
*Dhul fog baad ka laacdaa sidii dheenta laalida'e*
*Ruuxii ku dhawraa si buu kuugu dhegayaaye*
*Dhabeelnimana way kugu jirtaa dhab iyo miisaane*
*Dhiidhiibsigaagiyo haddana dhuda wanaaggaaga*
*Dheehaaga maahee shishaad dhuux u leedahaye.*

*Dhulka lagama soo qodin dadkee Aadan baa dhalaye*
*Adigiyo hablaha dhinaca kale waysu dhigantaane*
*Dhud qudhaa ka wada beeranteen dhaadashada guude*
*Dhab-dhab baad ku kala leexateen adiyo joog-dheere*

*Dhawawelanka waxa kuugu wacan amase dhoohnaanta*
*Dhab-darrooyinkoodaa qalbigu dhaawac dumayaaye*
*Dhimir bay ku saareen dabool baali kaa dhigaye*
*Dhafoor-taabadkoodaa qodqoday dhabannadaadiiye*
*Dhaqaaq joogsigaagiyo wejiga dhaxanta saarsaaran*
*Dhadhansiga dareenkaa ka culus buuro soo dhacaye*
*Intaad adigu dhiillaysan tahay taydu waa dhicise.*

*Hadalkana nin yidhi waa dhigaa sii dheh baa dilaye*
*Inaan dhaabadeeyaan rabaa dhawr kal dabadeede*
*Dhaxalkeeda nimankii lahaa way dhebaandhebiye*
*Iyagaa dharaaraba intaan dhaafay sii odhane.*

*Dhaf-dhaf iyo halhays beena baad soo dhabdhabateene*

*Dhugatiyo cad xaaraan ah iyo dhoohan may cunine*
*Dhamaas lagu takooriyo ma jirin caado dhaaf kale'e*
*Dhab cad iyo ma haysaan daliil meel la sii dhigaye*
*Dhaqankaas cambaaraynayaa saaray dhiillada'e*
*Labadii hiyiga dheehi jirey way ka dheer tahaye?*
*Weligood dhibaatada adduun looma soo dhixine*
*Dhaadhaanno maahee kashaad dhooli mood tahaye.*

*Intii aad dhisnaydeen iyagu waa dhursugayeene*
*Dhufaannimo hagooglay intaas kula dhex joogeene*
*Dharaar uun in waa' kale beryey dhawrayeen abide*
*Dhegahay intaas la hadlayeen waa dhab may odhane*
*Dhibaatadana way eegayeen dhaayihii jiraye*
*Cishaday dhanaan tahay haddii laysu dholol fayto*
*Dhab u dirirka waa lagu yiqiin dhaanto iyo shiishe*
*Rag hadduu dhabiiltamo naftay dhigi yiqiinneene*
*In kastuu xiniindhaaf yuhuu dhiirrinnimo sheegto*
*Mar haddaan dhaliil laga gudbayn dhayalso mooyaane*
*Dareenkiisu wuxuu dhaadayaa hoos in loo dhigaye.*

*Dhardhaarray ahaayeen intaad dheri lahaydeene*
*Dheddig iyo labkoodaa ka kale dhinacyo taagnaaye*
*Ninka ay dhisaan baan isagu tooda dhaydhayine*
*Gudmahay dhabeeyeen ka badan lag iyo dheeraade*
*Hadday dhigan lahaayeen mid uun maalba may dhaqane*
*Dhaxalkiisa may soo xarayn dhogorta xoolaaye*
*Weligood dhalaal subag ah iyo dhaashi may heline*
*Dhay iyo karuur labada weel dhoosha may geline*
*Hadday dhami lahaayeen miduun dhiilba may tolane.*

*Dhegahooda maag baa qabsaday shayna may dhimine*
*Sibaa loo dhalliilaa haddana ruuxna may dhibine*
*Dhuyaal iyo kudaal bay damceen dhiigna may galine*
*Dhulka waa ka sii guurayaan ruuxna may dhicine*
*Dhoof bay ku daasteen inay sibiq dhaqaaqaane*
*Dhalashada inay dooriyaan bay u dhow dahaye*
*Dhagar inay galaan bay damceen dhaarse may marine*
*Dhaaxaan ogsoonaa halyey dhuuntay keligiiye.*

*Hadalkana nin yidhi waa dhigaa sii dheh baa dilaye*
*Inaan dhaabadeeyaan rabaa dhawr kal dabadeede*
*Dhaxalkeeda nimankii lahaa way dhebaandhebiye*
*Iyagaa dharaaraba intaan dhaafay sii odhane.*

*Godka dhidarka beelaha qotoow dhawr kal baa hadhaye*
*Hadduu dhiillo leeyahay dulmigu waad ka dheregteene*
*Intaad weel manno ah dhaamiseen waa dheg weyn tahaye*
*Dhanihii bad weyntiyo yuryuran waydinkii dhuraye*
*Ulihii dharkaynkiyo cayada waydinkii dhilaye*
*Dhamacdiyo dabkaad quudateen maaha dhalanteede*
*Dhayal maaha maalmaha intaad guulo dhigateene*

*Sabirkiinna dheer iyo xaqaa tiina soo dhicine*
*Adduunyada ninkii dhalad yaqaan waw dhab tiriyaaye*
*Dhibaatiyo waxaa lagu yaqaan teeda dhinac taale*
*Markaasay is dhaafdhaafayaan labada dhoomoode*
*Meel dhowna wuu kula kulmaa kay ka dheer tahaye*
*Meel dheerna way kala tagaan kay ku dhow dahaye.*

*Nin xaqiinna meel hoose dhigay tiisu waa dhedo'e*
*Xumaantana wanaag baa dhaxlee wayda haw dhimane*

*Naftu dhaabadhaabaha hiyiga way ku dhacantaaye*
*Kol haddii dhabbada loo qorqoro way ku dhilantaaye*
*Mar haddii qalbiga ciil dhufsado dhaaftay taladiiye*
*Sida Dhooddi-Meerkii Taleex haw dhaqaaqina'e*
*Dhirbaaxooyinkii quudhsigaa dhuunta yuurura'e*
*Haddii dhagar inaad gaysataan laabtu dhigi waydo*
*Sidaad dhaab u soofaysateen haw dhabaynina'e*
*Cishadaad wax dhiillayn kartaan dhaafa tii culuse*
*Dhanka Eebbahay xiga adduun wayska dhalanteede.*

*Hadalkana nin yidhi waa dhigaa sii dheh baa dilaye*
*Inaan dhaabadeeyaan rabaa dhawr kal dabadeede*
*Dhaxalkeeda nimankii lahaa way dhebaandhebiye*
*Iyagaa dharaaraba intaan dhaafay sii odhan.*

*Dhabdhabluhu markuu yimi arlada may dhammayn talo'e*
*Waa tay dhufaannadu khalqiga soo dhex geliyeene*
*Waa kii dhamaastiyo falkiyo keenay dhalanteede*
*Waa kii dhibaatada la yimi dheegadheegaha*
*Waa kii dhufaysyada qotee dhoombir soo rogaye*
*Waa tay dhankaas iyo dhankaas baahday dhiilladuye*

*Markay dhabaqday waa kii shacbigu soo dhalaashadaye*
*Waa taad dhadhaabtiyo budkiyo dhagaxa boobteene*
*Gobannimada waa tii dhagdhago dhaanto loo tumaye*
*Dharaartaana waad wada jirteen dhiiftu kululayde*
*Waa loo dhammaa maalmihii laysu dhaarsadaye*

*Hayeeshee ma sii dhugan caqligu teeda dhinac tiille*
*Dhiilladu halkay weeran tahay looma faal-dhigine*
*Waa tii la dhaawacay markay dhalatay guushiiye*

*Weligeed dhan baa qaawanaa dhidibbadeediiye*
*Xaajadu intay dhow dahay dhaymo leedahaye*
*Shinkeedii markay dhaaftay bay keentay dhabandheebe*
*Dhab-darro uma toosine nabsigu wuu dharaarsadaye.*

*Dhacan baa la saaraa halkii eel ka dhow dahaye*
*Markaasay dhurwaagiyo colkiyo dhawrta celisaaye*
*Nin dhug lihiba wuu garanayaa suuldhabaalaha'e*
*Dhabbadaad u xaadheen ninkii soo dhus layn jiraye*
*Dhextaalkeeda goortuu hubsaday soo dhabbacateeye*
*Dhaliilaha markuu sahansaduu meel ka soo dhacaye*

*Dhawaaq toosiyow baxay lugtii dhaaftay jeeniga'e*
*Waa kaas dhaqaaliyo hub iyo dhoof u soo helaye*
*Dhuxul hoos ka nool iyo dab baa soo dhabiib kiciye*
*Dhacadiidka xaajada gashiyo dhabanno hayskeeda*
*Markii aan dhab dayey baan is idhi dhacanta sii saare*
*Afdhabaan-dhabkeedii haddana waan ku dhiirradaye*
*Dhambaalkii digiintaan is idhi caawa yuu dhixine.*

*Dheehada Rashiidoow mar baan neefka loo dhigine*
*Magaceeda oo laba kordhaban yey dhawelantaaye*
*Marka dhiilka lala hoos galay meelo dhugataaye*

*Ummad yahay dhab baa loo hadlaa waa is dhigateene*
*Dulmigii lafaha dhuuxay baad dib u dhardhaarteene*
*Ummad baad xaqeedii dhammaa dhababka saarteene*
*Gunaadkii naftii weli ma dhigin waase dhiigbaxaye*
*Garaadkiinnu waa dhaafsan yahay dhiilka buuxsamaye*
*Maantana waxaa idin dhex taal tii dib loo dhigaye*
*Caaway u dhowdahay haddaa dhugasho siisaane*
*Haddaan dhaymo loo helin xujada mooyi tii dhiciye.*

*Hadalkana nin yidhi waa dhigaa sii dheh baa dilaye*
*Inaan dhaabadeeyaan rabaa dhawr kal dabadeede*
*Dhaxalkeeda nimankii lahaa way dhebaandhebiye*
*Iyagaa dharaaraba intaan dhaafay sii odhane.*

*Dhillowyahanku waa geed ka baxa dhuunta geed kale'e*
*Imikuu dhabbada soo hayaa dhaankii reer Yurube*
*Nin kastoo is dhoob-dhoobi jirey dhigaha loo laabye*
*Dheweraad hadday kala lahayd laysu soo dhuraye*
*Markii dhuuni loo rogay arlada dhoorku wada daalye*

*Dhallinyaradu way dayriyeen dhalashadoodiiye*
*Waa taa ninkii dhawrsanaa qaad ku soo dhacaye*
*Waa taa dhabeeshii hiddaha dhaylo loo dubaye*
*Dhuuq-dhuuqlayaashii batiyo heen dhalaashuhuye*
*Dheri bay ku wada foorortaa diiddan dhaqankiiye*
*Dheddig iyo labkeedii waqtigu dheel isugu keenye*
*Ummaddii dhiraha kala lahayd ways dhex huruddaaye*
*Dhegdheggiyo lafaha dhuubtay iyo dhogor xumaantooda*
*Qaraamaad markay wada dhantaa dheehu doorsamaye*
*Hadday dhoojo wada yeelatiyo dhiico iyo tuure*
*Haddii dhawrsanaan lagu yiqiin dhimay hankeediiye.*

*Dhibaatada xilkeedii horaad ugu dhabcaasheene*
*Maantana sidii dhagax-dixeed hawgu sii dhegine*
*Inta shay la dhawrtiyo haddaan diinta kugu dhaarsho*
*Haddaan dhaar Carriyo Caaggan iyo dhaar Cas kugu dhaarsho*
*Inta gabay dhaf leeyahay haddaan kaaga dhirafuulo*
*Haddaan dhaho haddaan dhigo haddaan weliba dhiib-dhiibo*
*Anigoon wax kuu dhimin haddaan dhegaha kuu buuxsho*
*Dhaqdhaqaaq ma kaa iman karaa dhiillo lagu baajo*

*Dhabtuun baa khalqigu diidayaa meesha dheer tegaye*
*Dhulgariirka waa laga baqaa waayo soo dhaxaye*
*La dhex joogi maayoo arlada dheelmashow qorane*
*Qofba wuxuu dhigtaa baa u yaal dhiilka aakhiro'e*
*Ninkii dhiirri sheegtow is furo waa dhanaan tahaye.*